

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA
ARRIMAH SHARCIGA EE TAYO
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية
مكتب تيو لتوثيق العقود
والإستشارات الشرعية
مقديشوا - الصومال

SHARCIGA DHISMAHA CARWO
(CARWO CITY GENERAL TRADING)



MUQDISHO –SOMAALIYA

2023



MASAWIRKA GUDOOMIYAHA CARWADA

ALI MOHAMED ADAN



MASAWIRKA GUDOOMIYE KU XIGEENKA CARWADA

IBRAHIM ISAC ABDULLAHI



MARKHAATIYAASHA

1-Saalim Aadan Shiikh Rooble



2-C/Ilaahi Maxamuud Cali



UJEEDDO:DHISMO CARWO MAS'UULIYADEEDU XADIDDAN TAHAY, OO LAGU MAGACAABO (CARWO CITY)

Maanta oo ay taariikhdu tahay **08/08/2023** Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, lehna Xafiiska Nootaayaha Tayo Public Notary ee ku yaalla Xamar, degmada H/Wadaag Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid mudanayaasha kala ah:-

1- Ali Mohamed Adan, Sita, License Lr 22816, Kana Soo Baxday Wasaarada Gaadiidka Ee D,F, Soomaaliya, kuna lifaaqan Dukumintigaan.

2- Ibrahim Isac Abdullahi, Sita Somali Pass Lr:-P00988052, kuna lifaaqan Dukumintigaan

Mudanayaasha kor ku xusan iyagoo caafimaad qaba, caqligooduna taam yahay, cid heshiiskaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxay i weediisteen inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Carwo, Waxaana Wehliya Labada Markhaati Oo kala ah 1-Saalim Aadan Shiikh Rooble, 2-C/laahi Maxamuud Cali

Sharciga Carwada Wuxuu Ka Kooban Yahay Qodobada Hoos Ku Qoran:-.


QODOBKA 1-AAD

MAGACA CARWADA

Mudanayaasha aan kor ku soo sheegay waxa ay sameysteen Sharci Carwo lagu magacaabo

(CARWO CITY) oo ah Carwo gaar loo leeyahay (Private), Iyago Sita Warqada Shatiga

Lr:A094682, Kana Soo Baxay D/Hoose Ee Muqdisho



QODOBKA 2-AAD

WAQTIGA LA' AASAASAY SHIRKADDA

Carwada **(CARWO CITY)** waxaa la'aasaasay **29-May-2022**, waxaana lagu aasaasay magaalada Muqdisho caasimadda Soomaaliya.



QODOBKA 3-AAD

NOOCA CARWADA

CARWADAN waa Carwo gaar loo leeyahay, waxaana ku soo biiri Kara Saamiley kadib markii ay Saxiixan Gudoomiyaha Iyo Gudoomiye Ku Xigeenka.

QODOBKA 4-AAD

XARUNTA CARWADA

Xarunta Carwada waa Muqdisho caasimadda Soomaaliya Degmada H/Wadaag-Waaxda Tabeelaha, Xarumaha, Carwada waa la kordhin karaa markii loo baahdo waxaana lagala xiriirayaa Gudoomiyaha Iyo Gudoomiye Ku Xigeenka Carwada.

QODOBKA 5-AAD

UJEEDDOOYINKA CARWADA

1-ka Ganacsiga Dharka Nucyihisa kala Duwan, Jumlo iyo Tafaariiq.

2-Ka Ganacsiga kabaha Nucyihisa kala Duwan Jumlo iyo Tafaariiq.

QODOBKA 6-AAD

RAASIMAALKA CARWADA & SIDA MILKIILAYAASHA U KALA LEEYIHIIN

Raasumaalka carwadu waa lacag dhan US **\$80,000** (Sideetan kun oo doolarka Mareykanka ah) Waxayna u kala leeyihiin Milkiilayaasha Carwada sida shaxda ku cad.

No.	Magaca Milkiilaha	Lacagta	Saamiga
1	Ali Mohamed Adan	\$ 40,000	50 %
2	Ibrahim Isac Abdullahi	\$ 40,000	50 %

QODOBKA 7-AAD

GADASHADA SAAMIGA

Marka Uu ku soo biiro Saamile kale waxaa uu xaq u leeyahay in uu gato saamigiisa marku rabo waana inuu u gudbiyaa Milkiilayaasha kale Ee Carwada iyadoo qoraal ah, haddii looga gadan waayo muddo **90** maalmood ah, wuxuu u madax banaan yahay in uu ka gato cidduu rabo. Saamiyada waa la kordhin karaa haddii loo baahdo saamiga islamarkaana saamile kasta waxaa uu xaq uleeyahay inuu kordhin karo saamigiisa .

QODOBKA 8-AAD

QAYBSASHADA FAA'IIDADA IYO KHASAARAHA

Faa'iidada iyo khasaara wixii yimaado waxaa iska leh dhamaan Milkiilayaasha, iyo Saamileeda.

QODOBKA 9-AAD


SHAKHSIYADDA QAANUUNIGA EE CARWADA

Carwada waxaa ay leedahay xuquuq qaanuuni ah, haddaba Magaca Carwada ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida Carwada sida: Dharka Nucyihisa kala duwan, Kabaha Nucyihisa kala duwan, sumadaha carwada iyo milkiilayaasha.



QODOBKA 10-AAD

QAAB DHISMEEDKA IYO MAAMULKA CARWADA



QODOBKA 11-AAD

AWOODAHA MAAMULKA CARWADA

Awoodaha Gudoomiyaha Iyo Gudoomiye Ku Xigeenka Carwada.

- 1- Waa Matalayaasha carwada ee dhammaan heshiisyada ay carwada galayso.
- 2- Waxay siin karaa wakaalad guud ama mid gaar ah xubin kamid ah milkiiyaasha carwada
- 3- Waa saxiixayasha foomka kamid noqoshada carwada
- 4- Waa dabagalyaasha iyo kormeeridda dhammaan shaqooyinka carwada
- 5- Waxay Maamulyaan Akoonada Magaca Carwada Ku Furan Bankiyada Dalka
- 6- Waaa Diwaan Galiyaasha Xisaabaadka Carwada

FG. Waxaa akoonka lacagta ka bixin karaan Ibraahim Isac Abdullahi Iyo Ali Mohamed Adan **Si Kali Kali ah ayey Lacagta uga saari karaan Akoonada Ku Furan Magaca Carwada.**

QODOBKA 12-AAD

GEERI AMA WAALLI

Haddii waalli ama geeri ku timaado Gudoomiyaha Iyo Gudoomiye Ku Xigeenka Carwada waxaa saamigooda lagu wareejinayaa dhaxaltooyadiisa sharciga ah ama ciddii kale ee maxkamadu u amarto.

QODOBKA 13-AAD

MUDDADA JIRITAANKA CARWADA

Carwada waxaa ay jiraysa muddo dhan **60** sano mudada jiritaanka carwada wa la kordhin karaa haddii ay ogolaadaan Gudoomiyaha iyo Gudoomiye Ku Xigeenka carwada waana layareyn karaa.

QODOBKA 14-AAD

BAABI'INTA CARWADA

Waxa ay baaba'aysaa Carwadu marka la helo qodobada soo socdo:-

1. Dhamaanshaha muddada jiritaanka Carwada.
2. Go'aan baabi'in ee ka soo baxo Maamulaha Iyo Gudoomiyaha.
3. Haddii Carwadu ay musalafto Islamarkaana ay u suurta gali weyso inay shaqeeysa.
4. Haddii uu soo baxo sharci baabinayo Carwada noocan ah.

QODOBKA 15-AAD

KALA QAYBSIGA HANTIDA CARWADA

Waxa la magacaabayaa guddi farsamo oo soo aruuriya hantida Carwada ee deynta ku maqan iyo midda taala, isla markaasna la bixiyo xuquuqda lagu leeyahay Carwada iyadoo lagu saleynaayo xeerka iyo shuruucda lagu dhisay Carwada.



QODOBKA 16-AAD

WIXII LAGA WAAYO SHARCIGA DHISMAHA CARWADA.

Wixii aan ku qornayn sharciga dhismaha Carwada waxaa loo raacayaa xeerka Carwada iyo sharciga carwooyinka ee dalka u degsan.

QODOBKA 17-AAD

DHAQAN GALKA SHARCIGA DHISMAHA

Sharciga dhismaha wuxuu dhaqangelayaa marka ay saxiixaan Gudoomiyaha Iyo Gudoomiye Ku Xigeenka Carwada, waxayna heshiiskan ay kala saxiixdeen, kadib markii ay akhristeen, raalina ka noqdeen sida aan u qoray heshiiskan, waana kan saxiixoda hoos ku cad:-

SAXIIXA GUDOOMIYAHA

1- ALI MOHAMED ADAN





SAXIIXA GUDOOMIYE KU XIGEENKA

2- IBRAHIM ISAC ABDULLAHI





SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- Saalim Aadan Shiikh Rooble,



2-C/Ilaahi Maxamuud Cali



QODOBKA 18-AAD

TIRADDA BOGAGGA IYO QODOBADA HESHIISKAAN KA KOOBANAYAHAY

heshiiskan wuxuu ka koobanyahay 18-qodob iyo 5-bog.

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP.794/TPN/2021 Tr. 08/08/2023, Muqdisho, Aniga oo ah:- **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed**"Max'ed Nootaayo" lehna Xafiiska Nootaayaha Tayo, Waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, islamarkaana ay wada saxiixeen milkiilayaasha Shirkadda iyo Markhaatiyaasha, Nootaayaduna waxey hubisay magacyadooda in ay yahay Kii dhabta ahaa ayna leeyihiin saxiixyada kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

SAXIIXA NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed"Max'ed Nootaayo"





Dawladda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Gaadiidka



Federal Republic of Somalia
Ministry of Transportation

Aqoonsiga Dereewalka

Driving License



Liqaansiga - License No

22816

Magaca - Name

Cali Maxamed Aadan

Jiriyadda - Nationality

Somali

Taariikhda Dhalashada - Date of Birth

19/03/1987

Meesha laga Bixiyey - Place of Issue

Mogadishu

Heerka Gaadiidka - Vehicle Type

D

Cali Maxamed Aadan



La Bixiyey - Issued Date

03/09/2020

La Dhammayso - Expiry Date

03/09/2023



A094682

LAMBAR BOONADA 001-0000071898

LACAGTA 100.00



DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
SHATIGA GANACSIGA

Business Permit

TAARIIKH / Date 08-Jun-2023

SHATIGAAN WAXAA LA SIIYAY

This permit hereby is granted to

CARWO CITY

MAGACA GANACSIGA (Tradename)

CALI MAXAMED AADAN

MAGACA MILKIILAHA / MAAMULAHA (Name of Owner / Manager)

WAXAA LOO OGOLAADAY OO KALIYA GANACSIGA HOOS KU XUSAN:

To operate and engage in the business/es of:

GANACSIGA TAFARIIKHDA DHARKA

SHATIGAN WAXA LOO OGOL YAHAY OO
KALIYA CINWAANKA GOOBTA HOOS KU XUSAN

Business under this permit shall exclusively be
Conducted at the address indicated below:

Degmada/Deegaanka:	Howlwadaag	WAAXDA:	Axmed Gurey
LAANTA:	N/A	TABEELAHA:	N/A

SHATIGAN WAXA UU DHACAYAA

This permit expires on the **08-Jun-2024**

Hadii aadan ka run sheegin macluumaadka aad bixisay, ogsoonow in Shatiga dib lagaala noqon doono iyadoo waliba sharciga lagula tiigsan doono.



Duqa Magaalada ee Muqdisho
Mayor of Mogadishu

Yuusuf Xuseen Jimcaale

KOMBUYUUTAR SHATI

LAMBAR / Computer Serial No.

64525





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 09/08/2023

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Saalim Aadan Shiikh Rooble** oo ka Wakiil ah **Ali Mohamed Adan Iyo Ibrahim Isac Abdullahi** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 794/W.P.N/23, Tr. 08/08/2023**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	Ali Mohamed Adan Iyo Ibrahim Isac Abdullahi
Taariikhda Caddeynta	08/08/2023

Wakiilka Loo Caddeeye: Aniga oo ah **Saalim Aadan Shiikh Rooble**, Leh Tel No. **0615532839**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaday Xafiiska **Nootaayaha Waddani** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyihiin **Ali Mohamed Adan Iyo Ibrahim Isac Abdullahi**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Saalim Aadan Shiikh Rooble
